



# Su'aallaha wadatashiga tabaha ee jaaliyaddaha laga tirada badan yahay

## Maxaad ka taqaanaa gargaarka sharciga

1. Maxay tahay jaaliyadda adiga aad isku tiriso?
2. Haddii adigu aad xubin aad ka tahay jaaliyadda laga tirada badan yahay / qof maddow ah, muxuu yahay danaha kuugu jira Caawinaada Sharciga ee wadatashiga Tabaha Jaaliyaddaha laga Tirada badan ee Ontario.
3. Haddii ay ku hayso dhibaato dhanka sharciga, halkee ayaad tageysaa si caawinaad aad u hesho?
4. Ma maqashay weligaa Caawimaad xaga kharashka qareenka ee Ontario [Legal Aid Ontario]?
  - a. Haddii aad “haa” ku jawaabtay maxaad ka ogtahay adeegyada ay bixiyaan xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] iyo Miisaaniyada?
  - b. Ma sahlanaa in la helo adeegyada ay bixiyaan xarunta gargaarka sharciga?
5. Maxay yihiin qaar ka mid ah waxyaabaha xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] ay samayn karto si ay wanaajiso in dadka ay ku wargeliso sida ay dadka u caawini karto? (Gaar ahaan jaaliyaddaada dhexdeeda?)
6. Sideen ula socodsiin karnaa xubnaha jaaliyaddaada in aan ogeysiino sida aan iyagu caawin karno?

## Adeegyada gargaarka sharciga ee loogu talgalay jaaliyaddaha laga tirada badan yahay

1. Ma aaminsan tahay in tayada adeeggaha ay helaan kaliyantiga dadka maddowga ay la siman tahay tayada adeeggaha ay helaan kaliyantiga dadka caddaanka ah? Maxay tahay sababtu ama aysan u ahayn?
2. Sidee ayay u wanaajin karaan adeegyada Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] (tusaale ahaan, bixinta lacagta qareenka, fidinta talo dhanka sharciga ama kaalmada maalinta maxkamadda, deeqaha loogu talagalay ee la siiyo xarumaha sharciga, iwm.) iyo helida adeegyada ay siiso, jaaliyada laga tirada badan yahay?
3. Maxay yihiin qaar ka mid ah dhibaatooyinka dhanka sharciga ee adiga ama xubnaha jaaliyaddaada oo kaalmo aad u baahan tihiin ee xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] aysan adeegyadaas iminka bixin? (tusaale ahaan, ma jiraa qayb ka mid ah sharciga ee jaaliyaddaada saameeyo ee xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] aysan iminka bixin?)
4. Maxay yihiin caqabaddaha dhanka adeegyada gargaarka sharciga ee jaaliyaddaada ay wajahayso?

---

## Sidee ayay shaqaalaha gargaarka sharciga u wanaajin karaan aqoontooda iyo xirfaddahooda

1. Maxay yihiin qaar ka mid ah waxyaabaha ay shaqaalaha xarunta gargaarka sharciga ay qaban karaa oo ay ku wanaajin karaan qaabka ay u caawiyaan jaaliyaddaha laga tirada badan yahay?
2. Maxay yihiin nooca barnaamij waxbarasho ama tabbar ee looga baahan yahay in qaataan shaqaalaha xarunta gargaarka sharciga si ay markaas uga war hayn ama u ogaadaan arrimaha ay wajahaan dadka laga tirada badan yahay?
3. Hadda xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] waxay qareennada [lawyers] kalyanti qaar ay uga baahan yihiin in ay takhasus sharci gaar ah ay u leeyihiin aqoon jaaliyaddaha kuwa nugal. Maxay yihiin nooca tabbar ee loo baahan yahay in ay leeyihiin iyo maxay yihiin melaha?

---

## Ururinta xogta qowmiyaddaha ku salaysan

LOA waxay xogta qowmiyaddaha ku salaysan ayay kalyantiyada ka ururin doontaa in si wanaagsan looga shaqeeyo adeegyadeena oo dowladda Ontario aan ku wargelinno arrimaha saamaysa jaaliyaddaha laga tirada badan yahay.

1. Sidee baad dareentaa ama ma kuu sahlan tahay in aad qof u sheegto jinsigaaga marka aad adeeg ka dalbanaysid xarunta gargaarka sharciga?
2. Maxay tahay waxa ay samayn karaan xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] si dadka ay uga caawiyaan in aysan lur dareemin si ay uga jawaabaan su'aallaha jinsigooda/isirkooda ku saabsan?
3. Maxay kula tahay tan ku saabsan in xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] ay xogtaada jinsiga kaliya ay la wadaagto - ma jiro doono xogta la xidhiidhka shaqsi oo kalyantiga sheegi doonta oo la raacinnayo ama lagu daro – oo kalyantiga laga ururiyo?
  - a. Haddii ay kula tahay in xogtaas la wadaagi karo, kuma ayaa la la wadaagi doonaa? (tusaale ahaan, Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario, aqoonyahannada, qareennada, iwm.)
4. Maxay yihiin xogta kale ee aad isleedahay waa loo baahan yahay in la ururiyo (tusaale ahaan, da', jinsi, iwm.), haddii ay jiraan? Maxay tahay sababtu ama aysan u ahayn?

---

## Xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] oo adiga kuu doodaya

1. Maxay kula tahay doorka looga baahan yahay xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] marka laga hadlayo talo ka bixinta isbeddellada ku aadan nidaamka caddaaladda goorta laga hadlayo qaabka qowmiyaddaha loola dhaqmo?
2. Waa kuwee kooxaha ama ururrada jaaliyadahaaga ka jira ee loo baahan yahay in xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] ay la shaqayso si ay u saamayso noocyada isbaddellada?
3. Maxay tahay waxa Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario] ay samayn karaan si ay gacan uga geystaan xuquuqaha ay leeyihiin jaaliyaddaha laga tirada badan yahay?
4. Maxa kale oo ay u baahan yihiin in ay ogaadaan xarunta Gargaarka Sharciga ee Ontario [Legal Aid Ontario]?